

Jirrabaadna idinma qabsan tan dadka wada qabsata mooyaane, laakiin Ilaah waa aamin, mana oggolaan doono in laydin jirrabo intaad karaysaan in ka badan, laakiin markii laydin jirrabo wuxuu samayn doonaa jid aad kaga baxsataan si aad ugu adkaysan kartaan. 1 Korintos 10:13

Waayo, waxaan hubaa inaan dhimashada, ama nolosha, ama malaa'igaha, ama kuwa madaxda ah, ama waxyaalaha haatan jooga, ama waxyaalaha iman doona, ama kuwa xoogga leh, ama kor, ama hoos, ama uun kaleeto inaga sooci karin jacaylka Ilaah oo ku jira Rabbigeenna Ciise Masiix. Rooma 8:38-39

Waayo, Masiixu wuxuu mid kasta oo rumaysta u yahay sharciga dhammaadkiisii xagga xaqnimada. Rooma 10:4

... waayo, wuxuu leeyahay, Wakhti la aqbalay ayaan ku dhegaystay, Oo maalintii badbaadintana ayaan ku caawiyey. Bal eeg, hadda waa wakhtigii la aqbalay; bal eeg, hadda waa maalintii badbaadinta. 2 Korintos 6:2

Markay taas maqleen ayaa qalbiga laga wareemay, markaasay ku yidhaahdeen Butros iyo rasuulladii kale, Walaalayaalow, maxaannu falnaa? Markaasaa Butros iyagii ku yidhi, Toobad keena, oo midkiin kasta ha lagu baabtiiso magaca Ciise Masiix dembidhaafkiinna aawadiis, oo waxaad heli doontaan hadiyadda ah

Ruuxa Qoduska ah. Falimaha Rasuullada 2:37-38

... oo aad huwataan dabiicadda cusub oo loo abuuray inay Ilaah ugu ekaato xaqnimada iyo qodusnimada runta. Efesos 4:24

Maxaa yeelay, dhammaan way wada dembaabeen oo gaadhi waayeen ammaanta Ilaah; Rooma 3:23

Sida qoran, Mid xaq ahu ma jiro, midnaba; Rooma 3:10

Waayo, mushahaarada dembigu waa dhimashada, laakiinse hadiyadda Ilaah waa nolosha weligeed ah ee laga helo Rabbigeenna Ciise Masiix. Rooma 6:23

Haddaba sida dembigu nin keliya dunida ugu soo galay, dhimashaduna dembiga ugu timid, sidaasaa dhimashadiina u gaadhay dadka oo dhan, waayo, waa la wada dembaabay; Rooma 5:12

Waayo, innagoo weli itaal daran ayuu Masiixu wakhti qumman u dhintay kuwa aan cibaadada lahayn. Rooma 5:6

Laakiinse Masiixu waa inoo dhintay intaynu weli dembiilayaal ahayn, oo sidaasuu Ilaah jacaylkiisii ionoogu muujiyey. Rooma 5:8

... oo sarakiciddii uu ka sara kacay kuwii dhintay ay ku caddaysay inuu xagga ruuxa

qodusnimada yahay Wiilka Ilaah oo xoog leh oo ah Rabbigeenna Ciise Masiix. Rooma 1:4

Waynu og nahay in Masiixa oo kuwii dhintay ka sara kacay uusan mar dambe dhimanayn; dhimashadu mar dambe u talin mayso. Rooma 6:9

Maxaa yeelay, haddaad afka ka qiratid in Ciise yahay Rabbiga, oo aad qalbiga ka rumaysatid in Ilaah isaga ka sara kiciyey kuwii dhintay, waad badbaadi doontaa. Rooma 10:9

Waayo, ku alla kii magaca Rabbiga ku baryaa, waa badbaadi doonaa. Rooma 10:13

Waayo, waxaan hubaa inaan dhimashada, ama nolosha, ama malaa'igaha, ama kuwa madaxda ah, ama waxyaalaha haatan jooga, ama waxyaalaha iman doona, ama kuwa xoogga leh, ama kor, ama hoos, ama uun kaleeto inaga sooci karin jacaylka Ilaah oo ku jira Rabbigeenna Ciise Masiix. Rooma 8:38-39



Do you know for sure that you have a place in heaven? Or do you fear there is a place in hell for you?

If you would like to know more about the God of the Bible and the way of peace and happiness that He has made, you may ask us for a free New Testament, without obligation, and read it in the privacy of your own home.

A basic (English language) Bible Correspondence Course with 10 parts has been specially prepared to help newcomers to the Bible understand its meaning.

[‘Bible Distributors’ do not represent any sect or denomination.]

✂ -----

Please send me a free New Testament in Somali / English

Name : _____

Address : _____

Sabuurrada, 23

1) Rabbigu waa adhijirka i jira; waxba u baahan maayo.

2) Wuxuu i fadhiisiiyaa doog qoyan dhexdiis, Oo wuxuu ii hoggaamiyaa bihaya deggan dhinacooda.

3) Naftayda wuu soo celiyaa. Oo magiciisa aawadiis wuxuu igu hor kacaa waddooyinka xaqnimada.

4) In kastoo aan ku dhex socdo doxada hooska dhimashada, Sharna ka baqi maayo, waayo, waad ila jirtaa, Ushaada iyo hangoolkaaga ayaa ii raaxeeya.

5) Cadaawayaashayda hortooda waxaad iigu diyaarisaa miis, Oo saliid baad madaxayga ku subagtaa, koobkayguna waa buux dhaafaa.

6) Hubaal cimrigayga oo dhan waxaa i raaci doona wanaag iyo naxariis, Oo weligay guriga Rabbiga ayaan degganaan doonaa.

Kitaabka Qoduuska Ah: © United Bible Society 2004

BIBLE DISTRIBUTORS

Fountain House, Conduit Mews, London SE18 7AP
UK

Free Bible Correspondence Course in English available on request

www.chaptertwo.org.uk

Somali

January 2005

Rabbigu waa adhijirka i jira

Maxaa yeelay, dhammaan way wada dembaabeen oo gaadhi waayeen ammaanta Ilaah. Rooma 3:23

Waayo, mushahaarada dembigu waa dhimashada, laakiinse hadiyadda Ilaah waa nolosha weligeed ah ee laga helo Rabbigeenna Ciise Masiix. Rooma 6:23

Waayo, idinku waxaad ku badbaaddeen nimco xagga rumaysadka, mana aha wax xaggiinna ka yimid, laakiinse waa hadiyadda Ilaah, mana aha xagga shuqullada, si aan ninna ugu faanin. Efesos 2:8-9

Laakiin cashuurqaadihii meel fog ayuu ka istaagay, ma uuna doonaynin inuu indhihiisa cirka u qaado, laakiin laabtiisa ayuu garaacay isagoo leh, Ilaahow, ii naxariiso anigoo dembi leh. Luukos 18:13

Ilaah intuu dunida jacayl u qabay ayuu siiyey Wiilkiisa keliya oo dhashay in mid kastoo isaga rumaystaa uusan lumin laakiinse uu lahaado nolosha weligeed ah. Ilaah Wiilka uguma soo dirin dunida inuu xukumo dunida, laakiin wuxuu u soo diray inay dunidu ku badbaaddo isaga. Yooxanaa 3:16-17